

## Dallacsinta Fsaslka Seddexaad: Hagaha Racfaanka Waalidka

Sanadkii 2021, Golaha Guurtida Tennessee waxay ansixiyeen wax-ka-beddel lagu sameeyay T.C.A. § 49-6-3115, oo ah sharciga u dallacsinta fasalka 3aad ee gobolka, kaasoo hubinaya in ardayda u baahan taageero dheeri ah ay heli karaan kahor inta aan loo dallacsiiin fasalka 4aad. Guddiga Waxbarashada Gobolka (SBE) waxay dejiyeen xeerar lagu aas-aasayo hanaanka racfaanka ee loogu talagalay ardayda loo aqoonsaday in lagu celinayo fasalka 3aad.

### **Yaa xareysan kara racfaan?**

- Waalidka ama mas'uulka u xareyn kara racfaan ku saabsan ardaygooda.
- Waalidka ama mas'uulka ardayga ayaa sidoo kale saxiixi kara foom oggolaansho siinaya wakiilka degmada waxbarashada ama iskuulka xeerka gaarka ah leh si uu racfaanka ugu gudbiyo ardayga iyaga oo ku hadlaaya magacooda. Foomka Oggolaanshaha Racfaanka waxaa laga heli karaa bogga internetka ee [Dedejinta Waxbarashada \(Learning Acceleration\)](#).

### **Goormee ayaan xareysan kara racfaan?**

- Muddada racfaanka waxay furan tahay laga bilaabo Maay 28 – Juun 27, 2025. Dhamaan racfaanada waa in la gudbiyaa inta lagu jiro muddadaas si loo tixgeliyo.

### **Yaa u qalma in uu racfaan qaato?**

- Ardayda helay natijjada "ku dhow in uu keeno filashooyinka" (approaching expectations) ee imtixaankooda ay dib ugu laabashada ee ELA TCAP ama ELA TCAP.
  - Kawaran haddii ardaygaygu uu helay "wuu buuxiyay inta filashooyinka" ama "wuxuu ka sara maray filashooyinka" imtixaankooda ay dib ugu laabashada ee ELA TCAP ama ELA TCAP.
    - Kuma jiraan halista in dib loogu celiyo fasalka, sidaa darteed racfaan looma baahna.
  - Kawaran haddii ardaygaygu uu helay "wax ka hooseeya filashooyinka?"
    - Kaliya ardayda hela "approaching expectations" ayaa u qalma racfaan sida uu dhigayayo sharciga. Booqo bogga [Dedejinta Waxbarashada \(Learning Acceleration\)](#) si aad u aragto waddooyinka kale ee u suurtagelin kara ardayga inuu u gudbo fasalka 4aad, la xiriirna maamulaha dugsiga ardaygaaga.

### **Waa maxay waxyaabah looga baahan yahay in racfaan la oggolaado?**

Waalidiinta ama wakiilada rasmiga ah ee degmada dugsiga ama iskuulka xeerka gaarka ah leh waxay racfaan ku gudbin karaan mid ka mid ah labada sababo ee hoose:

#### **Sababta 1:**

Racfaanka sababta 1aad wuxuu ka kooban yahay afar shardi oo ay tahay in dhammaan la buuxiyo:

1. Ardayga uu keeno boqokiiba 40% ama ka sareysa inta lagu jiro maamulka guga ee TN-URS (Aimsweb).
2. Maamulaha dugsigu uu oggolaado in uu u diyaariyo qorshe taageero waxbarasho ee lagu saxayo daldaloolada ee ardayga.
3. Macalinka ELA-da ee ardayga iyo maamulaha ay bixiyaan talo-bixin mideysan oo ah in ardayga la dallacsiiyo.
4. Degmada dugsiga ardayga ama iskuulka xeerka gaarka ah leh ay oggolaadaan inay siyyaan ardayga kalsooni buuxda oo ah adeegyo waxbarid gaar ah oo tayo sare leh laguna bixiyo kooxo yar oo arday ah sanad-dugsiyeedka fasalka afraad oo dhan.

**Sababta 2:**

racfaanka Sababta 2aad wuxuu sheegaa in ardayga uu la kulmay musiibo weyn muddo 60 maalmood gudahood ka hor ama xilliga imtixaanka TCAP, taas oo saameyn ku yeelatay awoodda ardayga inuu ku muujiyo aqoonta hadda uu leeyahay imtixaanka.

Tusaalooyinka dhacdada musiibada ah waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn:

- Geerida ku timid xubin dhow oo qoyska ka tirsan
- Guri lumin
- Warbixin caafimaad oo culus

**Maxaa macluumaad ayaan u baahanay si aan u gudbiyo racfaan?**

- **Xogta Ardayga:** Magaca sharciga ah iyo taariikhda dhalashada
- **Macluumaadka Waalidka ama Wakiilka Dugsiga:** Magaca, iimaylka, iyo lambarka taleefanka
- **Aqoonsiga Gobolka ee Ardayga:** Lambar 7-god ah oo laga heli karo dugsiga ardaygaaga. SSID khaldan wuxuu dib u dhigi karaa dib-u-eegista
- **Sababta 1:** Foomka Talo-bixinta Racfaanka Sababta 1 oo la dhameystiray (laga heli karo bogga) [Dedejinta Waxbarashada \(Learning Acceleration\)](#) oo ay ku jiraan dhammaan saxiixyada lagama maarmaanka ah ee maamulaha iskuulka ardaygaaga iyo macallinka ELA-da. Waxaa lagaa doonayaan inaad soo geliso nuqulka foomka markaad gudbinayso racfaanka
- **Sababta 2:** Sharaxaad ku saabsan dhacdadii musiibada ahayd oo ay ku jiraan taariikhaha iyo macluumaadka muujinaya sida sida ay dhacdadu u dhacday 60 maalmood ee kalandarka kahor imtixaanka TCAP ama muddadaas gudaheeda u saameysay awoodda ardayga ee muujinta aqontiisa hadda ee imtixaanka.

**Sidee ayey racfaanada u shaqeeyaan?**

Waalidiinta ama wakiillada loo xilsaaray ee degmada waxbarashada ama iskuulka xeerka gaarka ah leh ayaa buuxin doona Foomka Racfaanada ku Celinta Fasalka 3<sup>aad</sup> ee ku jira bogga [Dedejinta Waxbarashada](#) oo racfaan ku gudbinaya iyaga oo ku salaynaya mid ka mid ah labada sababood ee la oggol yahay. Racfaanka waxaa qiimeyn doona waaxda go'aanna waxa lagu siin doonaa muddo 14 maalmood gudahood ah laga bilaabo marka la gudbiyo haddii dhammaan xogta la bixiyay ay dhammaystiran tahay oo ay sax tahay.